*DULMARKA*

# WARBIXINTA SANNADLAHA EE BAARISTA U HOGGAANSANAANTA SHARCIGA

Sannad Maaliyadeedka Dhammaaday
31da December 2024

**XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD**
EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# EREYADA LA SOO GAABIYEY

| | |
|---|---|
| **AFROSAI** | African Organization of Supreme Audit Institutions |
| **AFROSAI-E** | African Organisation of English-speaking Supreme Audit Institutions |
| **ARABOSAI** | Arab Organization of Supreme Audit Institutions. |
| **AIS** | Automatic Identification System |
| **BFS** | Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya |
| **BUSH** | Baarista U hoggaansanaanta Sharciga |
| **DFS** | Dowladda Federaalka Soomaaliya |
| **EEZ** | Exclusive Economic Zone |
| **FMC** | Fisheries Monitoring Centre |
| **GD** | Gaadiidka Dowladda |
| **IUUF** | Illegal, Unreported, and Unregulated Fishing |
| **INTOSAI** | International Organization of Supreme Audit Institutions |
| **ISSAIs** | International Standards of Supreme Audit Institutions |
| **JFS** | Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya |
| **SFMIS** | Somali Financial Management Information System |
| **XFS** | Xukuumadda Federaalka Soomaaliya |
| **XHG** | Xafiiska Hantidhowrka Guud |

# TUSMADA WARBIXINTA

EREYADA LA SOO GAABIYEY .......... 1

GOGOLDHIG .......... 3

FARRIINTA HANTIDHOWRAHA GUUD JFS .......... 5

HORDHAC .......... 7

WALXAHA LA BAARAY .......... 8

HALBEEGYADA BAARISTA LOO ISTICMAALAY .......... 9

UJEEDDOOYINKA IYO BAAXADDA BAARISTA .......... 10

DULMAR GUUD .......... 11

HEERKA KHATARAHA 21 HAY'ADOOD EE AAN BAARAY .......... 18

GUNAANAD .......... 19

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS

جمهورية الصومال الفيدرالية
ديوان المراقبة العامة

Federal Republic of Somalia
Office of the Auditor General of FRS

**Han. Lam#:** XHG/HG-561/2025 **Taariikh:** 30/06/2025

Guddoonka labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya,
Muqdisho, Soomaaliya

**Mudaneyaal & Marwooyin,**

Waxa aan ku faraxsanahay in aan idin soo gudbiyo Warbixinta Baarista Sannadlaha ah ee U-hoggaansannaanta Sharciga, taas oo Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS uu ku sameeyay **laabatan iyo kow (21) Hay'adood**, oo ka mid ah hay'adaha Dowladda Federaalka Soomaaliya sannadkii dhammaaday **31[da] December 2024**, isaga oo mudnaanta baarista siiyay u soo xushay hay'adahaas in lagu sameeyo Baarista u hoggaansanaanta sharciga kaddib natiijada ka soo baxday heerka qiimaynta khataraha (**risk assessment**) ee Qorshaha Baarista oo Xafiiska Hantidhowrka Guud uu sameeyay, Baaristan U-hoggaansannaanta Sharciga, waxa aan u sameeyay si waafaqsan Sharciyada kala ah, **Sharci Lr. 22, 2016, Sharci Lr. 17, 2019 iyo Sharci Lr. 14, 2023**, Sharciyada kale ee quseeysa maamulka howlaha Dowladda iyo Heerka Baarista Hay'adaha Hantidhowrista Guud ee Caalamiga ah (ISSAIs) maadaama Xafiiska Hantidhowrka Guud, uu xubin ka yahay Hay'adaha Hantidhowrka Guud ee Caalamiga ah (INTOSAI), Hay'adaha Hantidhowrka Guud ee Qaaradda Afrika (AFROSAI), Hay'adaha Hantidhowrka Guud ee Afrika ee ku hadla luuqadda Ingiriiska (AFROSAI-E) iyo Hay'adaha Hantidhowrka Guud ee Dalalka Carabta (ARABOSAI).

Warbixintan waxa aan ku caddeeyay inta aan aragnay Khaladaadka ku soo baxay Baarista U-hoggaansannaanta Sharciga kuwaas oo isugu jira cillado ka jira dhinacyada Hannaanka Maamulka Iibka Agabka, Adeegyada, iyo Hawlaha, Hannaanka Maamulka Hantida, Deeqaha Dibadda ee aan lagu darin Miisaaniyadda Qaranka sidoo kalena aan la marsiin Nidaamka Maareynta Xogta Maaliyadda Soomaaliya (**SFMIS**), Akoonno ka furan Bankiyada gaarka loo leeyahay oo aan lagu furin habraaca habeynta Bangiyada, Hannaanka Diiwaangalinta Shirkadaha Dowladdu wax ka soo iibsato, Hannaanka Diiwaangalinta Iyo Nidaamka Bixinta Shatiga Shirkadaha Dhismaha iyo Aruurinta Dakhliga.

Si waafaqsan Qodobbada 5[aad] iyo 9[aad] ee Sharci Lr. 14 ee 2023, sannadkii 2024, Xafiiska Hantidhowrka Guud waxa uu bixiyey **120 talooyin** ah oo quseeya hagaajinta maamulka, maaraynta maaliyadda, iyo horumarinta isla xisaabtanka hay'adaha dowladda. Haddaba Sida ay muujisay Warbixinta Dabagalka Talooyinka Hantidhowrka (**Audit recommendations follow up report**) Guud ahaan taladaas hay'adaha Dowladdu waxa ay si buuxda u fuliyeen **30%**, halka **12%** laga fuliyey qayb ahaan, hase ahaatee **58%** talooyinkii la siiyey ayaan weli la fulin.

Villa Somalia, Mogadishu, Somalia www.oag.gov.so oag@oag.gov.so

Haddaba, heerkaas fulinta talooyinka hantidhowriseed oo ah mid ka hooseeya intii aan fileynay waxa uu muujinayaa baahida weyn ee maamulka hay'adaha Dowladdu ay u qabaan xoojinta iyo dar-dar gelinta fulinta talooyinka hantidhowriseed iyo kuwa u hoggaansananta sharciga si looga miro dhaliyo yoolalka iyo ahdaafta Dowladda, loona xaqiijiyo dhaqan-galka mabaadii'da isla-xisaabtanka iyo hufnaanta maamulka hantida Dowladda.

Mudaneyaal, waxa aan aad ugu rejo weynahay in Madaxda sare ee Dowladdu ay sida ugu wanaagsan uguna suuragalsan ugu biirin doonaan kaalintooda ku aaddan fulinta talooyinka iyo xal u heliddda cilladaha aan tilmaamay ee ka jira hay'adaha maray BUSH, iyada oo mas'uuliyiinta u xilsaaran maamulka hay'adahaas aan ka filayno in ay fuliyaan talooyinka Hantidhowrku la wadaagay si ay u saxaan khaladaadka maamulka hantida iyo maaliyadda Dowladda, ayna kor ugu qaadaan isla-xisaabtanka iyo daahfurnaanta.

Ugu danbeyn, waxa aan u mahad-celinayaa Madaxweynaha JFS, Ra'isalwasaaraha Xukuumadda, Guddoonka Labada Gole ee BFJS, mas'uuliyiinta Wasaaradaha iyo dhammaan hay'adaha kale ee Dowladda ee sanadkan XHG ku sameeyey Baaristan oo garab igu siiyay gudashada waajibaadka fulinta Hantidhowris madax-bannaan, waxa aan si gaar ah ugu mahad-celinayaa shaqaalaha hay'adaha Dowladda oo nala wadaagay macluumaadkii ay BUSH u baahnayd si ay u soosaarto Natiijo waxtar leh la fulin karo islamarkaana horseedi kartaa horumarinta Maamulka iyo Nidaamka Guud ee hay'adaha dowladda

.

Guuleysta Goor & Ayaan,




**Mudane. Axmed Ciise Guutaale**
**Hantidhowraha Guud, JFS**

**OG:** Ra'iisul Wasaaraha XFS,
Madaxweynaha JFS,

Villa Somalia, Mogadishu, Somalia www.oag.gov.so oag@oag.gov.so



# FARRIINTA HANTIDHOWRAHA GUUD JFS

Adeegyada hantidhowrka iyo soo saarista Warbixinnadiisa sanadlaha ah waxa ay aad muhiim ugu yihiin korjoogteynta iyo Qiimeynta Natiijooyinka ka soo baxa Maamulka iyo Maareynta Khayraadka Guud ee dowladda, waxa kale oo ay Warbixinnada Hantidowrku xog qiime leh ka bixinayaan ilaa heerka aan dal iyo dowlad ahaanba xaqiijineyno gaarista yoolasheenna horumarineed iyo ujeeddooyinkeena bixinta adeegyo ku habboon Muwaadinka.

Sidaas awgeed Adeegyada hantidhowrka iyo soo saarista Warbixinnada Maaliyadda, heerka u hoggaansanaanta sharciga iyo Qiimeynta Waxqabadku waxa ay xoojinayaan Mabaadiida Isla-xisaabtanka iyo Gudashada Mas'uuliyadda Guud ee la xariirta sida loo kharash-gareeyey dakhliga iyo deeqaha dowladda

# Dulmarka Taloooyinka 2024


## Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS

Talooyinka hantidhowrista, Maamulka iyo u hoggaansanaanta Sharcigu (compliance) waxa ay muhiim u yihiin horumarinta Wax-qabadka hay'adaha dowladda, hoos u dhigidda iyo la tacaalidda khataraha ka dhex jira hay'adahahaas (Risks Mitigation), talooy-inkaasi waxa ay ku hagaan Maamulka hay'adaha dowladda  xal u helidda gaabisyada jira, hagaajinta howlgalka hay'adaha iyo hubinta u hoggaansanaantooda Sharciga.

Fulinta talooyinkaas ee hay'adaha dowladdu waxa ay horseeddaa xoojinta ilaalinta gudaha iyo maareynta khataraha, waxa ay kord-hisaa wax-ku-oolnimada iyo kalsoonida daneeyeyaasha sida Mu-waadinka.

Haddaba Xafiiska Hantidhowrka Guud isaga oo fulinaya Waajibka bixinta iyo dabagalka talooyinka hantidhowrista, Maamulka iyo u hoggaansanaanta Sharciga islamarkaana ilaalinaya Mabaadiida Maamul-wanaagga waxa uu dhammaan hay'adaha dowladda ku dhiirrgelinayaa fulinta dhammaan talooyinka la socda War-bixinada Sanadlaha ah ee Hantidhowrka Guud oo ay kamid tahay Warbixinta Baarista u hoggaansananta sharciga.

### Heerka Fulinta Talooyinka XHG ee BUSH-2023



# HORDHAC

Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS waa hay'ad dastuuri ah, madax-bannaan oo heer federaal ah si waafaqsan Qodobka 114[aad] ee Dastuurka Ku-meelgaarka ah ee 2012, sidaas oo kale waa hay'adda ugu sarreysa ee ka masuulka ah dhowrista, baarista iyo kawarbixinta hantida dowladda sida ku cad Qodobka 4[aad] ee Sharci Lr. 14, 2023.

XHG waxa uu fuliyaa mabaadi'da dowlad wanaagga, hufnaanta, daahfurnaanta iyo isla-xisaabtanka ku saleysan ka hortagga lunsiga hantida dowladda, waxa uuna sameeyaa hantidhowris madax-bannaan oo sanadle ah si waafaqsan Sharci Lr. 17, 2019 iyo Sharci Lr. 14, 2023, XHG marka uu gudanayo hawlihiisa hantidhowriseed waa ka madax-bannaan yahay dhammaan laamaha dowladda, mana jiro amar ama kor-joogteyn uu ku leeyahay qof ama maamul kale, waxa uuna u-hoggaansamaa Dastuurka iyo shuruucda kale ee dowladda oo keliya.

Iyada oo haddaba laga duulayo Waajibkaas sharciyeed ee saaran Xafiiska Hantidhowrka Guud, waxa aan sanadkan 2025 fuliyay Baarista U hoggaansanaanta Sharciga oo aan ku sameeyay labaatan iyo kow (21) hay'adood oo ka tirsan hay'adaha Dowladda Federaalka Soomaaliya. Baaristu waxay ku saabsanayd heerka U hoggaasanaanta sharciyada, xeerarka, iyo nidaamyada maaliyadeed ee hay'adahaas ee sanad maaliyadeedkii ku dhammaaday 31[da] December 2024.

Baaristan waxaa la fuliyay iyada oo la raacayo Halbeegga Caalamiga ah ee Baarista Hantidhowrista Sare (ISSAIs), gaar ahaan kuwa la xiriira Baarista U Hoggaansanaanta Sharciga (Compliance audits) lana waafajiyay Sharciyada Hantidhowrka Guud, Maareynta Maaliyadda Dowladda, iyo xeerarka kale ee dhaqangalka ah.

Xulashada hay'adaha baarista aan ku sameeyay waxa aan ku saleyeeyay hannaanka qiimeynta khatar (risk-based assessment), iyada oo aan tixgelin siiyay muhiimadda hay'adahaasi u leeyihiin howlgalka DFS, Qoondada miisaaniyadeed, Kaalinta ay ku leeyihiin dhaqaalaha, dakhliga, Maamulka iyo heerkooda u-hoggaansanaanta Sharcgiga, siyaasadaha iyo habraacyada maamulka kheyraadka dowladda.

# WALXAHA LA BAARAY

Baaristan waxaa la fuliyay iyada oo la tixgalinayo walxaha la baaraay sida hoos ku xusan:

- Hannaanka Maamulka Iibka Agabka, Adeegga iyo Hawlaha;
- Hannaanka Maamulka Hantida;
- Isticmaalka Nidaamka Maareynta Xogta Maaliyadda Soomaaliya (SFMIS) ee ku aaddan Deeqaha Dibadda iyo Habraaca Habeynta Bangiyada
- Habraacyada Kalluumaysiga ee badda JFS;
- Xareynta dakhliga iyo jaangoynta Tariifada;
- Habraacyada Hubinta Jiritaanka adeeg-bixiyeyaasha;
- Arimaha Kale ee Ahmiyadda Leh (Other Audit Matters).

# HALBEEGYADA BAARISTA LOO ISTICMAALAY

- Dastuurka Ku meel-gaarka ah JFS 2012;
- Sharci Lr. 14, 2023
- Sharci Lr. 17, 2019
- Sharci Lr. 22, 2016 iyo Wax ka bedelkiisa Lr. 20, 2020;
- Sharci Lr. 65, 1972
- XR Lr. 137- 2023
- XR Lr. 1390- 023
- Sharci Lr. 13-2019
- Sharci Lr. 10, 2015
- Sharci Lr. 02, 1972
- Sharci Lr. 008, 2023
- Sharci Lr. 005, 2017
- Sharci Lr. 006, 1987
- Nidaamka Ilaalinta Balanqaadyada (Commitment Control System), 2022-2023;
- Habraaca iyo Shuruudaha Diiwaangelinta Shirkadda (Vendor Registration) ee Xafiiska Xisaabi-yaha Guud.

# UJEEDDOOYINKA IYO BAAXADDA BAARISTA

Baarista U hoggaansanaanta Sharcigu waa hirgelinta Hantidhowris iyo Qiimeyn Madax-bannaan taas oo xaqiijineysa Ujeeddooyinka sooscoda

- Hubinta ilaa heerka ay hay'adaha dowladda ee ay quseyso Baaristu ay u hoggaansan yihiin ku dh-aqanka Shuruucda, habraacyada iyo heerarka Caalamiga ah ee Hantidhowrista Caalamiga ah oo ay Soomaaliya aqoonsan tahay, iyada oo la tixraacayo walxaha la baaray (subject matters) ee sannad maaliyadeedka ku dhammaaday 31da Dec, 2024;
- Hubinta In xeerarka, hab-raacyada iyo kormeerada gudaha ee la adeegsado ay yihiin kuwo ku filan hirgelinta ilaalin wax-ku-ool ah oo ku saabsan Qiimeynta, Ururinta iyo Qoondeynta dakhliga Dow-ladda;
- Baarista in Hantida Guud ee dowladda loo kharash-gareeyey si waafaqsan mabaadiida maamulka Maaliyadda Guud ee dowladda si Hantidhowraha Guud uu u soo saaro warbixin leh hubanti macquul ah (reasonable assurance) taas oo ku saabsan in hay'adaha la xushay ay u hoggaansameen shuruuc-da;
- In Hantihdowrku uu dabagal ku sameeyo ilaa heerka fulinta talooyinka iyo Natijada ka soo baxday baaritaannada uu Xafisku  hore u fuliyey, si loo hubivo in la raacay isla markaana ay hay'adauhu saxeen khalaadaadkii hore loo tilmaamay;
- Xaqiijinta in Saraakiisha Guud (Public Officials) ay mas'uuliyaddooda iyo howlahooda u gudanayaan si Waafaqsan Shuruucda, Xeerarka iyo Habraacyada Maamulka howlaha hay'adaha dowladda.

# DULMAR GUUD

Si waafaqsan Qorshaha fulinta Baarista U hoggaansanaanta Sharciga, waxa aan Xiriirro wadashaqeyn hufan la sameeyay maamulka hay'adaha sanadkan aan ku sameeyey baarista, si aan fursad ugu siiyo in ay saxaan natiijada khaladaadka ku soo baxay, Qayb ka mid ah xiriirradan waxa aan ku muujiyay warqadaha maamulka (management letters) iyo weydiimo Xafiisku la wadaagay intii baaristu socotay (audit queries) dhammaan maamulka hay'adaha sanadkan lagu fuliyay Baarista U hoggaansanaanta Sharciga.

Baaristan waxa aan diiradda ku saaray heerka U-hoggaansannaanta Sharciga (Compliance), Xeerarka, Xeer-nidaamiyaasha iyo Habraacyada ee waxyaabaha la baaray (subject matters) oo ay ugu muhiimsanyihiin:

- Hannaanka Maamulka Iibka Agabka, Adeegga iyo Hawlaha;
- Hannaanka Maamulka Hantida;
- Isticmaalka Nidaamka Maareynta Xogta Maaliyadda Soomaaliya (SFMIS) ee ku aaddan Deeqaha Dibadda iyo Habraaca Habeynta Bangiyada
- Habraacyada Kalluumaysiga ee badda JFS;
- Xareynta dakhliga iyo jaangoynta Tariifada;
- Habraacyada Hubinta Jiritaanka adeeg-bixiyeyaasha;
- Arimaha Kale ee Ahmiyadda Leh (Other Audit Matters).

Natiijada iyo khaladaadka aan warbixintan ku soo bandhigay waa waxyaabihii aan xalka loo helin intii baaristu socotay, waxa ayna ka kooban tahay:

- Khaladaadka ugu waaweyn ee baalmarsan, Shuruucda, Xeerarka, Xeer-nidimiyaasha iyo Habraacyada.
- Talo-bixinta baarista (Audit recommendations) oo aan ugu talo-galay si wax looga qabto Khaladaadka ay soosaartay Baarista U Hoggaansanaanta Sharciga.

## 1. HANNAANKA MAAMULKA IIBKA AGABKA, ADEEGGA IYO HAWLAHA

### Khaladaadka

**U hoggaasan la'aanta habraaca diyaarinta Qorshaha Sanadlaha ah ee Qandaraaska Iibka hay'adaha dowladda**

Sideed (8) hay'adood oo ka mid ah 21[da] hay'adood ee lagu fuliyay baarista sanadlaha ah ee BUSH ayaa sameeyay Iib kharashkiisu dhanyahay **US $21,794,882.10**, iyaga oo aan marin habraaca Qorshaha Qandaraaska Iibka hay'adaha dowladda ee ku cad Qodobka 27[aad] (1 & 4), Sharciga Iibka Qaranka, Lr. 22, 2016.

**Kala qaybinta  iibka hay'adaha Dowladda**

Lix (6) ka mid ah hay'adaha maray Baarista U hoggaansanaanta Sharciga ayaa kala qeybiyay wax soo iibsi dhan **US $9,076,850.99** iyaga oo aan marin habraaca kala Doorashada hababka Qandaraaska Iibka hay'adaha dowladda ee ku cad Qodobka 69aad ee Sharciga Iibka Qaranka ee 2016 iyo Nidaamka Ilaalinta Balanqaadyada (Commitment Control System) ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud.

**Maqnaanshaha xulasho hordhac ah ee hay'adaha Dowladda**

Maamulka lix (6) hay'adood ayaa fuliyay iib xaddigiisu dhan yahay **US $1,249,658.87** iyaga oo aan sameyn xulasho hordhac ah (prequalification), sida ku faahfaahsan habraaca ku xusan Qodobka 19(1 & 2) Sharci Lr. 22, 2016.

**Howlgelin la'aanta ilaalinta iyo Baaraha Gudaha**

Toban (10) hay'adood oo kamid ah labatan iyo kowda (21) hay'adood ee aan baaray ayaa siddeed kamid ah soo saarin Warbixinta baaraha gudaha, halka laba kamid ahna aysan laheyn baaraha gudaha, taasina waxa ay horseeday maqnaanshaha warbixinta baarista gudaha oo muhiim u ah hufnaanta maamulka iyo kormeerka gudaha ee hay'adaha Dowladda. Arrintan ayaa baalmarsan Qodobka 46(1) Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, Sharci Lr. 17, 2019 oo faraya in Baaraha Guduhu (Internal Auditor) ku kaalmeeyo Sargaalka idman Ilaalinta iyo Baarista Gudaha.

## Talo-bixin

Si waafaqsan Sharciyada kala ah:  Lr. 22, 2016, iyo Wax-ka beddelkiisa Lr. 20, 2020, Lr. 17, 2019 iyo Nidaamka Ilaalinta Ballan-qadyada ee Xafaiiska Xisaabiyaha Guud;

- Waa in dhammaan hay'adaha Dowladdu ay sameeyaan Qorshe Iib oo Sannadle ah lana ansixiyo;
- Waa in ay si nidaamsan u raacan habraacyada Kala Doorashada hababka Qandaraaska Iibka iyo xulashooyinka hordhaca ah ee iibka hay'adaha dowladda;
- Haddii hay'adda dowladeed ee Iibintu ay adeegsato hab qandaraas iib oo aan ahayn tartan kaqaybgal furan oo la xayeysiyay sida uu xeerinaayo Sharci Lr. 22, 2016, waa in asbaabta loo xushay habkaas lagu cadeeyo xusuus dhowrka habraaca Qandaraaska iibka;
- Iyada oo la tixgelinayo muhiimadda baaraha guduhu leeyahay hubinta hantidhowrista gudaha hay'adaha Dowladda waa in Madaxda Hay'adaha dowladdu hirgeliyaan Baaraha Gudaha, si waafaqsan habraaca ku cad Qodobka 46 ee Sharci Lr. 17, 2019;
- Si Waafqasan Qodobada 11aad Sharci Lr. 17, 2019 iyo  6aad iyo 9aad ee Sharci Lr. 14, 2023 Talooyinka hantidhowriseed, kuwa Sharci iyo kuwa la xariira farsamada ee uu bixinayo Xafiska Hantidhowrka JFS waxa ay ku saleeysan yihin caddeymaha ka soo baxay shaqada Hantidhowriseed ee la fuliyey sidaas awgeed waa in dhammaan hay'adaha dowladdu si wanaagsan u raacan talaooyinka iyo tilmaamaha ku lifaaqan ama la socda Warbixintan BUSH, Fulinta tallaabooyinkani oo kali ah kuma koobna u-hoggaansannaanta sharciyada balse waxa ay sidoo kale kor u qaadeysaa daahfurnaanta iyo isla xisaabtanka hannaanka iibka ee hay'adaha Dowladda.

# 2. HANNAANKA MAAMULKA HANTIDA

## Khaladaadka

**Hannaanka maamulka gaadiid Dowladda oo aan dhameystirneyn**

**Sideed (8)** hay'adood oo ka mid ah hay'adaha lagu sameeyay Baarista U Hoggaansanaanta Sharciga ayaa haysta **sideetan iyo sideed (88)** gaadiid ah, kuwaas oo aan loo dhameystirin hannaanka maamulka Gaadiidka Dowladda.

**Maqnaanshaha diiwaangelinta Qalabka xafiiseedyada dowladda**

**Toban (10)** hay'adood oo kamid ah hay'adaha la baaray sanadkan 2024 ayaan qalab xafiiseedkooda ku diiwaangalin Nidaamka SFMIS-ka, si waafaqsan Xeer Ra'isalwasaare Lr. 137, ee Hantida Danta Guud 2023.

**Maareyn la'aanta hantida dhaqan ka baxa ah ama aan laga faa'ideysan**

**Afar (4)** hay'adood oo ka mid ah hay'adaha kaqaybgalay Baarista U Hoggaansanaanta Sharciga ee sanadka 2024 ayaa haysta hanti dhaqan ka bax ah iyo hanti kale oo aan laga faa'iideysan, taas oo iskugu jirta Gaadiid iyo Qalab xafiiseed, baabi'inta hantida dhaqan-kabaxa ah, ka saaridda Diiwaanka Hantida dowladda iyo ka faa'iideysi la'aanta hantida waxtarka leh ayaa baalmarsan Xeer-nidaamiyaha Maareynta Hantida Dantaguud iyo agabka Dowladda ee 2023.

## Talo-bixin

Si Waafaqsan sharciga maareynta maaliyadda guud iyo Qodobka 7$^{aad}$ ee Xeer Ra'isalwasaare Lr. 137, ee Hantida Danta Guud 2023:

- Waa in dhammaan hay'adaha Dowladdu diyaariyaan Qorshaha Dayactirka Hantida Ma guurtada ah ee dowladda, islamarkaana ku diiwaangeliyaan Nidaamka SFMIS-ka si dhamaystiran.
- Waa in dhammaan Gaadiidka dowladdu qaato taargada GD, islamarkaana ay caddaato Milkiyadda gaadiidkaas ee dowladda ka hor dhammaadka sannadka 2025.
- Dhammaan hay'adaha dowladdu waa in hantida dhaqan ka baxa ama la isticmaalin ee ay mas'uulka uga yihiin DFS ay u maareeyan si waafaqsan Sharci Lr. 17, 2019 iyo Qodobada 10$^{aad}$, 11$^{aad}$ iyo 12$^{aad}$ ee Xeer RW Lr. 137.
- Waaxda Hantida Qaranka ee Wasaaradda Maaliyaddu waa in ay u gudbisaa codsiga burburinta hantida dhaqan-ka-baxa ah Wasiirka Maaliyadda si uu u ansixiyo, marka la dhammeeyo hawsha khaarajinta, agabku waa in uu ka baxo gacanta Dawladda, Waaxda Hantida Qaranku waa inay agabka la burburiyey ku wargelisaa Xisaabiyaha Guud iyo Hantidhowraha Guud ee JFS si uu uga saaro Diiwaanka Hantida Dawladda.

# 3. ISTICMAALKA NIDAAMKA MAAREYNTA XOGTA MAALIYADDA SOOMAALIYA (SFMIS) EE KU AADDAN DEEQAHA DIBADDA IYO HABRAACA HABEYNTA BANGIYADA

## Khaladaadka

**Isticmaal la'aanta Nidaamka qasnadda dhaxe ee Dowladda ee deeqaha dibedda**

**Lix (6)** ka mid ah 21^da^ hay'adood ee aan sannadkan baaray ayaa saxiixay heshiisyo ay ku heleen deeq lacageed oo tiradeedu dhan tahay **US$5,050,841.55**, balse deeqdaas ayaa hay'adahaasi kharash-gareeyeen iyaga oo aan marin nidaamka maaliyadeed ee dalka (country's financial system) iyo habraaca haykalka Maareynta Deeqaha iyo Waajibaadka Hay'adaha aan Dowliga ahayn ee ku faahfaahsan Qodobka 38aad (1 & 2), Sharci Lr. 17, 2019.

**Habraaca Habeynta Bangiyada oo aan si dhammeystiran loo dhaqangelin**

**Afar (4)** ka mid ah 21^da^ hay'adood ee aan sannadkan baaray ayaa Bangiyada gaarka loo leeyahay ka furtay 17, Xisaab-socota (Current Accounts) iyaga oo aan marin habraaca habeynta Bangiyada ee ku cad Qodobbada kala ah 9(7) iyo 42(3), ee Sharci Lr. 17, 2019.

## Talo-bixin

Hay'adaha Dowladda ee kaqayb-galay BUSH ee 2024 iyaga oo u hoggaansamaya dhammaan sharciyada Maareynta Maaliyadda, Hantidhowrka iyo Xeerarka dhaqan-galka ah ee quseeya Maamulka iyo Maareynta Hantida dowladda  waa in ay sida ugu dhaqsaha badan u fuliyaan  talo-bixinta hantidhowriseed, Sharci iyo farsamo ee ku taxan xagga hoose:

- Sida ku cad Qodobbada 4^aad^ iyo 38^aad^ ee Sharci Lr. 17, 2019, ee habraacyada Dakhliga Dawladda Federaalka iyo haykalka Maareynta Deeqaha dibadda dhammaan deeqaha dibadda oo isugu jirta deeqaha lacagta ah iyo kuwa aan lacagta ahayn ee ay helaan hay'adaha Dowladda waa in ay kamid noqdaan dakhliga iyo miisaaniyadda guud ee Qaranka, waana in xogta deeqahaasi si faahfaahsan uga muuqato iyaga oo isticmaalaya Nidaamka SFMIS-ka.
- Waa in Xafiiska Xisaabiyaha Guud lagu wargaliyo lana ogeysiiyo Wasaarada Maaliyadda lacagta haraaga ah ee aan la isticmaalin si loogu daro miisaaniyadda sannadka xiga iyada oo la soo marinayo Nidaamka Maareynta xogta maaliyadda dowladda si waafaqsan Sharci Lr. 17 ee 2019.
- Iyada oo la dhowrayo ku dhaqanka Shuruucda Maaliyadda ee Dowladda waa in maamulka hay'adaha Dowladdu xaqiijiyo u hoggaansanaanta iyo ku dhaqanka habraaca Maareynta Deeqaha iyo Waajibaadka Hay'adaha aan Dawliga ahayn ee ku faahfaahsan Qodobka 38^aad^ Sharci Lr. 17, 2019.
- Waa in dhammaan heshiisyada ay hay'adaha Dowladdu dhinaca ka yihiin ee helidda deeqaha dibadda iyo gudaha laga diiwaangeliyo Xafiiska Hantidhowrka Guud si waafaqsan habraaca diiwaangelinta heshiisyada ee Sharciyada Lr. 22, 2016, Lr. 17, 2019 iyo Lr. 14, 2023.

- Waa in hay'adaha Dowladda ee furtay ama adeegsada Akoono aan loo marin furistooda iyo adeegsigooda habraaca habeynta Bangiyada ay kahor dhammaadka sanadka 2025, waafajiyaan habraaca habeynta Bangiyada ee ku cad 42aad ee Sharci Lr. 17, 2019.

# 4. HABRAACYADA KALUUMAYSIGA EE BADDA JFS

## Khaladka

**Maraakiib iyo Doomo si Sharci-darro ah uga kalluumeystay Biyaha JFS 2024**

- Baarista U Hoggaansanaanta Sharciga ee Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah sanadkii 2024 waxay muujisay in **57 markab iyo doomo** ay si sharci-darro ah uga kalluumaysteen Aagga Dhaqaalaha Gaarka ah ee Soomaaliya (**EEZ**). Baarista oo adeegsanaysa xogta Xarunta Kormeerka Kalluumeysiga (**FMC**) ayaa caddeysay in **(53) Markab** oo kamid Maraakiibta si sharci-darrada u kalluumeysatay ay wateen calanka **Iran**, halka kuwa kalena ay wateen calamada **Soomaaliya**, **Comoros**, iyo **Hindiya**. Dhaqdhaqaaqyadaasi sharci-darrada ah ayaa inta badan ka dhacay xeebaha **Hobyo**, **Eyl**, iyo **Bandar Beyla**, gaar ahaan bilaha **February**, **April**, iyo **November** 2024.

- Maraakiibta qaarkood waxay damiyey Nidaamka Aqoonsiga tooska ah (**AIS**), halka qaarna ay adeegsadeen aqoonsiyo been-abuur ah (**IMO/MMSI**), si ay uga dhuuntaan la socodka, falalkaas kalluumeysiga sharci-darrada ah ayaaebinaya Qodobada 41$^{aad}$, 42$^{aad}$, iyo 66$^{aad}$ ee Sharciga Kalluumeysiga (Lr. 008/2023).

## Talo-bixin

- Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah waa in ay Maraakiibta iyo Doomaha tiradoodu tahay **57$^{da}$** ee Kalluumeysiga Sharci-darrada ah ka fuliyey Aagga Dhaqaalaha Gaarka ah ee Soomaaliya ay mamnuucdo kuna darto Liiska Maraakiibta Sharci-darrada ah (**IUU Illegal, Unreported, and Unregulated fishing**) ee ay gacanta ku hayso hay'ad-goboleedka Maareynta Kalluumeysiga (**RFMOs-Regional fisheries management organisations**)

- Joojisaa bixinta ruqsadaha maraakiibta lagu helay falalka sharci-darrada ah si waafaqsan Qodobka 42$^{aad}$.

- Dhaqan-gelisaa ciqaabaha iyo ganaaxyada lacageed sida uu dhigayo, Qodobbada 143$^{aad}$-145$^{aad}$) islamarkaana adkeyso kormeerka iyo la socodka dhaqdhaqaaqa Maraakiibta

- Kor u qaaddaa iskaashiga Ciidanka Badda iyo Ilaalada Xeebaha si loo adkeeyo fulinta sharciga Kalluumeysiga ee JFS loogana hortago kalluumeysiga sharci-darrada ah.

# 5. ARIMAHA KALE EE AHMIYADDA LEH (OTHER AUDIT MATTERS)

## Khaladaadka

**Howl-gelinta Shaqaale aan si dhammeysiran u marin habraaca Shaqaalaha dowladda**

- **Toban iyo kow (11)** hay'adood oo ka mid ah 21 hay'adood ee aan sannadkan baaray ayaa howlgeliyey **769** howlwadeen kuwaas oo aan si dhammeysiran u marin habraaca Shaqaaleysiinta dowladda sidaas awgeedna aan qaadan mushaar iyo gunno midna, shaqaalahaas ayaa hay'adaha dowladda ee ay joogaan qaarkood waxa ay ka hayaan shaqooyin muhiim u ah howlgalka hay'adda.

**Habraaca Sharciga Shaqo Qorista Shaqaalaha Shisheeyaha oo aan si dhammeystiran loo dhaqangelin**

- Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ayaa sannadkii 2024 waxa ay ruqsadda shaqada (work permit) siisay shaqaale Shisheeye ah (Foreign Nationals) oo tiridaiisu dhan tahay **4,536** qof kuwaas oo dhammaan ka hawlgalaya oo keli ah Gobolka Banaadir, Shaqaaleynta Shaqaalahan Shisheeye ayaa dhacday iyada oo aan la dhisin Guddiga Qiimeynta Shaqaalaha Ajaanibta, sidoo kalena aan la soo saarin xeerka shaqooyinka ka reeban shaqaalaha Shisheeyaha, taas oo aan waafaqsanayn habraaca Sharciga Shaqo Qorista Shaqaalaha Shisheeye ee ku cad Qodobbada 3aad iyo 18aad.

## Talo-bixin

- **Kow iyo tobanka (11)** hay'adood ee howlgeliyey Shaqaalaha aan dhammeystiran habraaca Shaqada dowladda oo kaashanaya hay'adaha ay quseyso sida Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha bulshada, Guddiga Qaran ee Shaqaalaha dowladda iyo Wasaaradda Maaliyadda waa in ay sida ugu suuragalsan u mariyaan Shaqaalahaas Nidaamka Shaqada dowladda.

- Si waafaqsan habraaca Shaqo Qorista Shaqaalaha Shisheeye ee Sharci Lr. 10, 2015, waa in Wasiirka Wasaaraddu soosaaro Xeerka Shaqooyinka kareebban ama aysan qaban karin Shaqaalaha shisheeyaha.

- Si Waafaqsan Habraaca dhismaha Guddiga Qiimaynta Shaqaalaha Ajaanibta waa in Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada oo kaashaneysa hay'adaha iyo Guddiyada ay Quseyso uu magacaabo islamarkaana dhaqangeliyo Guddiga Qiimeynta Shaqaalaha Ajaaniibta.

# 6. HABRAACYADA HUBINTA JIRIRTAANKA ADEEG-BIXIYEYAASHA

## Khaladka

**Adeeg-bixiyeyaal aan si dhammeystiran loogu diiwaangelin Nidaamka (SFMIS)**

- Si aan waafaqsanayn Habraacayada u degsan Xafiiska Xisaabiyaha Guud ayaa Nidaamka SFMIS-ka looguu diiwaangeliyey adeeg-bixiyeyaal Sidoo kale waxa aan la dhaqangelin nidaamka  hubinta goobaha ganacsi ee shirkadaha adeegga siiya hay'adaha Dowladda, taas oo baalmarsan habraayada dhaqangalka ah ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud.

## Talo-bixin

- Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee dowladdu waa in uu sameeyaa kormeer iyo xaqiijin joogto ah oo lagu hubinayo goobaha iyo jiritaanka shirkadaha adeeg bixiyeyaasha ee lagu diiwaangeliyay Nidaam-ka SFMIS-ka; iyada oo si dhammeystiran loo raacayo habraaca iyo shuruudaha u degsan diiwaangelinta shirkadaha ee Nidaamka SFMIS-ka laga bilaabo sannadka 2025.

# HEERKA KHATARAHA 21 HAY'ADOOD EE AAN BAARAY

Warbixinta BUSH waxa ay muujisay heerar kala duwan oo quseeya U hoggaansanaan la'aanta Shuruucda maamulka hay'adaha DFS, tusaale ahaan 8 hay'adood ayaa laga helay 7 ilaa 10 khalad-maamul, taas oo muujinaysa in hay'adahaas ay ku jiraan khatar sare oo la xariirta U hoggaansami la'aan sharci. 8 hay'adood oo kale ayaa laga helay 4 ilaa 6 khalad-maamul, taas oo tilmaamaysa khatar dhexdhexaad ah balse u baahan wax ka qabasho waqtiyeysan, sidoo kale 5ta hay'adood ee kale ayaa laga helay 1 ilaa 3 khalad-maamul, taas oo Iyana muujinaysa heer hoose oo ku saabsan U hoggaansanaanta Sharciga.

Natiijadani waxa ay muujineysaa heerka khataraha hay'adaha dowladda ee sanadkan 2024 maray BUSH, taas oo u baahan in si gaar ah ay madaxda iyo Saraakiisha idman ee hay'adahani wax uga qabtaan hagaajinta iyo nidaaminta hubinta gudaha (internal controls), si gooni ahna hay'adaha ay ka muuqato in ay ka jirto gudahooda khatar sare (high risk):

| Heerka khataraha | Tiradda Hay'adaha | Heerka khaladaadka | Faahfaahin |
|---|---|---|---|
| **Sare** | 5 | **7-10** | Khaladaad maamul oo misaan leh ayaa ka jira. |
| **Dhexe** | 8 | **4-6** | Khaladaad maamul oo u baahan wax ka qabasho kooban ayaa ka jira |
| **Hoose** | 8 | **1-3** | Khaladaad maamul oo aad u kooban ayaa ka jira. |

# GUNAANAD

Si waafaqsan mabaadiida Hantidhowrista u hoggaansanaanta Sharciga (**Compliance Audit Principles**), Baarista u hoggaansanaanta sharcigu (**BUSH**) waa Qiimeyn madax-bannaan oo lagu soosaaro ilaa heer-ka Walxaha gaarka ah ee la qiimeynayo ay waafaqsan yihiin Sharciyada, xeerarka iyo siyaasadaha dh-aqangalka ah iyada oo la eegayo in howlaha, dhaq-dhaqaaqyada maaliyadeed iyo kuwa xogeed ay u hoggaansan yihiin ku dhaqanka Sharciyada hagaya hay'adda lagu fulinayo hantidhowrista (**audited entity**)

Hay'adaha sare ee Hantidhowristu (**Supreme Audit Institutions**) waxa ay kaalin wanaagsan ka qaataan xaqiijinta holw waxtar u leh dhammaan muwaadiniinta iyo dowladda iyaga oo taas u maraya fulinta korjoogteyn-dibadeed oo madax-bannaan (**independent external oversight**) si loo xaqiijiyo mabaadiida isla-xisaabtanka, Daah-furnaanta iyo ku dhaqanka sharciga

Natiijada joogtaynta Baarista U-hoggaansanaanta Sharciga (**BUSH**) ee Xafiiska Hantidhowrka Guud iyo tallooyinka ay bixisay awgeed, waxaa si tartiib ah u muuqday horumar la xiriira heerka u-hoggaansa-naanta sharciga, tayada dukumentiyada iyo diiwaannada, iyo hagaajinta hababka shaqo ee hay'adaha dowladda, waxa kale oo kobcaya wacyiga Saraakiisha Idman ee hay'adaha iyo shaqaalaha dowladda ee ku aaddan waajibaadkooda shaqo iyo muhiimadda ay leedahay fulinta talooyinka hantidhowriseed, taas oo si toos ah u taageeraysa maamul-wanaagga iyo isticmaalka hufan ee kheyraadka dadweynaha.

Xafiiska Hantidhowrka Guud waxa uu bogaadinayaa wada-shaqeyntii, furfurnaantii, iyo mas'uuliyaddii ay muujiyeen dhammaan hay'adihii kaqaybgalay **BUSH 2024**, iyada oo ay xusud mudan tahay kaalinta Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee dabagalka warbixinada hantidhowrka, taas oo ah tiir muhiim u ah xaqiijinta isla-xisaabtanka hay'adaha dowladda.

Sidoo kale waxa aan Madaxweynaha JFS iyo Ra'isalwasaaraha xukuumadda uga mahadcelineynaa gar-ab-istaaggii iyo taageeradii ay u fidiyeen fulinta howsha Hantidhowrka Guud.

**Mudane: Axmed Ciise Guutaale**
**Hantidhowraha Guud, JFS**

June, 2025

# XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA


Muqdisho, Soomaalyia

www.oag.gov.so | oag@oag.gov.so